SO



# Caruurta codsanaysa magangalyo caalami ah

Warbixinta caruurta aan cidna la socon ee dalbanaya magangalyo caalami ah sida uu qabo qodabka 4 ee xeerka (eu) ee lambarkiisu yahay 604/2013

Sababta aan kuu siinay warqadan waxaa weeye waxaad sheegtay baahida aad u qabto magangalyo waxaadna noo sheegtay inaad ka yartahay da'da 18 sano. Haddii aad ka yartahay 18 sano jir, waxaa laguu tixagalinayaa inaad tahay caruur. Sidoo kale waxaad maqli doontaa maamulka oo adiga kugu tilaamaya 'ilmo yar', taasoo la macno ah caruur. Maamulku waa dadka masuulka ka ah go'aan ka gaarista sheegashadaada magangalyo.

**Haddii aad halkan magangalyo ka radinayso iyadoo ay sababtu tahay inaad ka cabsnayso wadankaagii asalka, waxaan tan ugu yeernaa 'magangalyo doon'. Magangalin waa meesha lagugu siinayo magangalyada iyo badbaadinta.**


Markaad maamulka u qorto codsi rasmi ah oo aad ku waydiisanayso magangalyo, sharcigu wuxuu tan ugu yeedhaa 'dalbasho ama codsi magangalyo caalami ah'. Qofka waydiista magangalyo waxaa la dhahaa 'dalbade'. Mararka qaar waxaad maqli doontaa dadka oo kuugu yeeraya 'magangalyo doon'.

Waa inay waalidkaa kula socdaan, laakiin hadeysan kula socon ama haddii aad ku kala tagteen jidka, waxaad tahay **'ilmo aan lala socon'**.

Xaaladdan, waxaan ku siin doonaa 'wakiil'. Kaasoo qof wayn ah kaas oo kaa caawin doona habka nidmaaka. Isagu ama iyadu, wuxuu kaa caawin doonaa dalbashadaada wuxuuna kuu wehelin doonaa marka lagaa rabo inaad maamulka la hadasho. Waxaad wakiilkaaga kala hadli kartaa dhibaatooyinkaaga iyo cabsiyaha aad qabto. Wakiilkaagu wuxuu halkan u joogaa inuu xaqiijiyo in la tixgaliyo dantaada ugu muhiimsan, taasoo macnaheedu yahay baahiyahaaga, badqabkaaga,caafimaad qaabkaaga, hormarka bulsheed iyo in fikradahaaga xisaabta lagu darsado. Wakiilkaagu wuxuu sidoo kale xisaabta ku darsan doonaa suurtagalnimada in qoyskiina dib la iskugu keeno.

**Warqadan waxaa loogu talagalay warbixin kali ah. Hadafka laga leeyahay waa in la siiyo dalbadayaasha raadinaya magangalyada caalamiga ah warbixin ku haboon sida uu qabo nidaamka Dublin. Iyadu ma abuurayso/keenayso xuquuq ama waajibaad sharci ah. Xuquuqaha iyo waajibaadka Gobalka iyo shakhsigaba waxaa cadeeyay nidaamka Dublin waxaana lagu dajiyay Xeerka (EU) 604/2013.**

**©Midowga Yurub 2014**
**Dib usoosaaridda waa la ogalyahay. Wixii isticmaalid ah ama dib usoo saarid sawirada shakhsiga ah, waa in ogalaansho laga dalbadaa cidda tooska u leh xuquuqda daabacaadda.**




*Wadamada Dublin waxaa ku jira 27ka wadan ee Midowga Yurub Ayrlandi (IE), Biljam (BE), Bolaandi (PL), Bulgeriya (BG), Danmarki (DK), Faransa (FR), Fiilaan (FI), Giriig (EL), Hangari (HU), Isbayn (ES), Isloofaakiya (SK), Isloofeeniya (SI), Istooniya (EE), Iswiidhan (SE), Jarnani (DE), Jeeg Ribablik (CZ), Karooshiya (HR), Khubras (CY), Laadfiya (LV), Laxanbargi (LX), Litu'aaniya (LT), Malta (MT), Nedarlandi (NL), Ostariya (AT), Purtaqiis (PT), Roomaaniya (RO), Talyaani (IT), iyo sidoo kale 4ta wadan ee la « xiriirta » Xeerka Dublin Noorwey (NO), Ayslaandhi (IS), Iswiisarlaandhi (CH), iyo Lijtenistiin (LI)*



©European Union

**HADDII AY JIRAAN WAX AADAN FAHMIN, WAYDIISO WAKIILKAAGA AMA MAAMULKAYAGA SI AY KUU CAAWIYAAN!**

Inkastood wadankan magangalyo waydiisatay, waxaa laga yaabaa in wadan kale ay tahay in uu baaro codsigaaga magangalyo.

Hal wadan oo kaliya ayaa masuul ka noqon kara tixgalinta codsigaaga magangalyo. Kaas oo uu qoondeeyo sharciga la dhaho **'Xeerka Dublin'**. Sharcigan wuxuu nooga baahanyahay inaan ogaano inaan masuul ka nahay inaan baadhno dalabkaaga ama in wadan kale uu masuul kayahay – tan waxaan ugu yeedhnaa 'nidaamka Dublin'.



Sharcigan wuxuu ka shaqaynayaa gobalka juquraafi ahaan ay kujiraan 31 dal[1]. Warqaddan dhexdeeda,waxaan ugu yeernaa 31dan dal 'wadamada Dublin'.

Maamulka ha ka cararin ama ha u cararin wadan kale oo dublin katirsan. Dadka qaar baa ku dhahaya sidan ayaa ah waxa ugu wanaagan ee la sameeyo. Haddii uu qof ku dhaho carar, ama i raac, u sheeg wakiilkaaga ama maamulka si dhakhso ah.

Fadlan sida ugu dhakhso badan uguna macquulsan ugusheeg maamulka gobalka haddii**:**

- *Aad kaligaa tahay oo aad u malaynayso in hooyadaa, aabahaa, walaalkaa ama walaashaa, eedadaa[2], adeerkaa ama abtigaa[3], ayaydaa ay joogaan mid kamid ah 31da dal ee wadamada Dublin ee ka muuqda khariiradda bogga 3;*
- *Haddii ay saas tahay, inaad rabto inaad iyaga la noolaato iyo inakle;*
- *Haddii aad horey usoo joogtay mid kaloo ka mid ah 31da dal ee 'wadamada Dublin' ee la sheegay;*
- *Faraha lagaaga qaaday wadan kale oo ka tirsan wadamada Dublin: faraha la iska qaado waa sawir farahaaga laga qaado kaasoo caawinaya in lagu garto;*
- *Aad horey magangalyo uga dalbatay wadan kale oo Dublin katirsan.*

**AAD BAY MUHIIM U TAHAY INAAD LA SHAQAYSO MAAMULKA GOBALKA OO AAD MARKASTA RUNTA U SHEEGTO.**

Sistamka Dublin wuu ku caawin karaa haddii aysan ku wehlin waalid markaad dalbanayso magangalyada.

Haddii aan hayno warbixin nagu filan oo iyaga ku saabsan, waxaan kuu raadin doonaa waalidkaa ama qaraabadaada joogta wadamada Dublin. Haddii aan helno, waxaan isku dayi doonaa inaan iskugu kiin keeno wadanka uu waalidkaa ama qaraabadaadu joogaan. Wadankaas ayaa marka masuul ka noqon doona baadhista codsigaaga magangalyo.

---

**1) Bogga 3 waxa ku yaalla khariiradda gobalkan()**
**2) Hooyadaa walasheed ama aabahaa walashii**
**3) Hooyadaa walaalkeed ama aabahaa walaalkii**

Haddii aad kaligaa tahay oo aadan haysan qoys ama qaraabo kuu joogta wadan kale oo Dublin katirsan, waxay u badantahay in codsigaaga lagu baaro wadankan. Waxaan sidoo kale dooran karnaa inaan codsigaaga ku baadhno wadankan, xitaa haddii sharci ahaan uu wadan kale masuuliyadda leeyahay. Waxaan sidan u samayn karnaa binii'aadantinimo, qoys ahaan ama sababo dhaqan la xiriira.

Inta lagu guda jiro nidaamkan, **waxaan markasta ka shaqaynaynaa sida kuu fiican,** kuumana diri doono wadan la ogyahay in lagu tumanayo xuquuqdaada aadantinimo.

Maxaa laga wadaa **waxaan markasta ka shaqaynaynaa sida kuu fiican?** Waxaa laga wadaa:

- Waxaan fiirin doonaa inay macquul tahay in qoyskiina la iskugu kiin keeno isla hal wadan;
- Waxaan xaqiijin doonaa inaad amni iyo nabad heshid, gaar ahaan inaad ka heshid amni dadka laga yaabo inay si xun kuula dhaqmaan/ku waxyeeleeyaan;
- Waxaan xaqiijin doonaa inaad u korto hab ammaan ah oo caafimaad leh, iyo inaad hesho cunto iyo guri iyo in laga shaqeeyo sidii lagu heli lahaa hormarka buslheed eed u baahantahay;
- Waxaan xisaabta kudarsan doonaa fikradahaaga – tusaale ahaan, sida inaad rabto inaad qaraabada la joogto iyo inaadan rabin.




©European Union

## Da'daada

Dadka ka wayn 18 sano waa "dad waaweyn" waxaa loola dhaqmaa si ka duwan sida caruurta iyo yaryarka ("ilmaha").

Fadlan da'daada ka run sheeg.

Haddii aad haysato wax dikuminti ah oo tusinaya da'daada, la wadaag maamulka. Haddii maamulku ay da'daada su'aal ka qabaan, waxaa macquul ah in uu dhakhtar ku baadho si uu u arko inaad ka wayntahay ama ka yartahay 18 jir. Adiga iyo/ama wakiilkaagu waa inaad marka hore arintan isku raacdaan ka hor intaan la samayn wax baadhis caafimaad ah.


LAYMANKA SOO SOCDA WAXAAN ISKU DAYI DOONAA INAAN UGA JAWAABNO SU'AALAHA UGU BADAN EE LAGA YAABO INAAD KA QABTO NIDAAMKA DUBLIN, WAY KU CAAWIN KARTAA WAXAYNA KAA CAAWIN KARTAA WAXA AAD RAJAYNAYSO INAY DHACAAN:

## Faraha la iska qaado – Maxay yihiin? Maxaa loo qaadayaa?

Markaad codsato magangalyo, haddii aad tahay 14 jir iyo kawayn, sawir farhaaga ah (oo la dhaho "faro qaadis") ayaa la qaadi doonaa waxaana loo gudbin doonaa kaydka xogta la yiraahdo "Eurodac". Waa inaad wada shaqayn ka gaysataa habkan, - dhamaan dadka magangalayada dalbada wuxuu sharcigu ku waajib yeelay in faraha laga qaado.

Faraha lagaa qaaday waxaa laga hubin karaa isla meesha si loo eego in aad waligaa codsatay magangalyo hadda ka hor ama in la eego in horaan faraha lagaaga qaaday meel xuduud ah. Haddii la ogaado in aad horey magangalyo uga dalbatay wadan kale oo Dublin katirsan, waxaa laguu diri karaa wadankaas haddii ay dantaada ku jirto inaad halkaas tagto. Wadnakan ayaa markaa masuul ka noqn doona baadhitaanka codsigaaga magangalyada caalamiga ah.

Faraha lagaa qaaday waxaa la kaydin doonaa 10 sano. 10 sano kadib, si otomaatig ah ayaa looga tirtiri doonaa kaydka xogta. Haddii aad ku guulaysato codsigaaga magangalayada, faraha lagaa qaaday waxay ku jiri doonaan kaydka xogta ilaa si otomaatig ah looga tirtiro. Haddii, markaa kadib, aad muwaadin ka noqoto wadan ka tirsan Dublin, faraha lagaa qaaday waa la tiritiri doonaa. Kaliya farhaaga iyo jinsigaaga ayaa lagu kaydin doonaa Eurodac – magacaaga, sawirkaaga, taariikhdaada dhalasho iyo asalkaaga looma diri doono kaydka xogta ama lama kaydin doono. Sikastase ha haatee, macluumaadkan waxaa lagu kaydin karaa kaydkayaga xogta qaranka. Xogta lagu kaydiyo Eurodac lalama wadaagi doono wax wadan ah oo kale ama urur ka baxsan wadamada Dublin.



Marka la gaaro 20ka Julaay 2015, farahaaga waxaa baadhi kara maamulada sida booliska iyo xafiiska booliska Yurub (Europol) waxayna codsan karaan inay galaangal u yeeshaan kaydka xogta Eurodac iyadoo ay ujeedadu tahay ka hortagidda, dareemidda iyo baadhista danbiyada khatarta ah iyo argagixisada.


©European Union

## Warbixinteed xaqiijin doontaa inay maamulada gobalku ka ogaadaan xaaladaada?

Waxay u badantahay in lagu waraysto si loo awoodo in la go'aansado wadanka masuulka ka ah baadhista codsigaaga magangalyo. Waraysigan, maamuladayada gobalka ayaa kuu sharixi doona 'nidaamka Dublin' waxayna isku dayi doonaan inay ogaadaan haddey macquul tahay in dib la iskugu kiin geeyo qoyskiina jooga wadan kale oo Dublin katirsan.

Haddii aad ogtahay in waalidkaa, walalahaa ama qarabaada ay joogaan wadan kale oo katirsan Dublin, fadlan ha iloobin inaad tan u sheegto qofka ku waraysanaya. Na sii warbixin badan inta aad karto ee macquulka ah si ay nooga cawiso inaan helno qoyskaaga – magacyadooda, ciwaankooda, lambaradooda telfoonka, iwm.

Inta lagu guda jiro waraysiga, waxaa laga yabaa in sidoo kale lagu waydiiyo in aad horey u joogtay wadan kale oo Dublin katirsan iyo inkale. Fadlan runta sheeg.

Wakiilkaaga ayaa kugu wahelin kara waraysiga, si uu kuu siiyo caawin iyo taageero iyo si uu u sameeyo waxa adiga kuugu fiican. Haddii aad haysid wax sababo ah oo aadan u rabin in wakiilkaagu uu halkaas kula tago, waa inaad u sheegtaa maamulada gobalka.

**WARAYSIGA BILOWGIISA, WARAYSTAHA IYO WAKIILKAAGU WAXAY KUU SHARIXI DOONAAN NIDAAMYADA IYO XUQUUQAHAAGA HADDII AY JIRAAN WAX AADAN FAHMIN, AMA AAD SU'AALO KALE QABTO, FADLAN IYAGA WAYDII!**

Waraysigu waa xaq aad leedahay waana qayb muhiim ah oo ka mid ah dalbashadaada.

Waraysiga waxaa lagaaga qaadi doonaa luuqad aad fahmi karto. Haddii aadan awoodin inaad fahanto luuqadda la isticmaalayo, waxaad waydiisan kartaa turjumaan si uu wadahadalka kaaga caawiyo. Turjumaanku waa inuu turjumaa waxaad adiga iyo waraystuhu dhahaysaan oo kali ah. Turjumaanku waa inuusan ku darin fikradihiisa shakhsiyeed. Haddii ay dhibaato kaa haysato fahmidda turjumaanka, waa inaad noo sheegtaa oo aad la hadashaa wakiilkaaga.

Waraysigu wuxuu ahaan doonaa sir. Tan macnaheedu waxaa weeye warbixinta aad bixiso, oo ay ku jirto xaqiiqada ah inaad magangalyo ka codsatay wadankayaga looma diri doono shakhsiyaad ama muumul laga yaabo in ay si un waxyeello kuugu gaystaan ama ay waxyeelo u gaystaan xubin qoyskaaga ka mid ah kaasoo wali jooga wadankaagii hooyo.

**WAA MUHIIM IN ADIGA IYO WAKIILKAAGUBA AAD KA WARHAYSAAN QAAB DHISMEEDKA WAKHTIYADA NIDMAAKA DUBLIN!**



## Intee in le eg ayay qaadanaysaa ka hor intaydaan ogaan inaan wadan kale aadayo iyo inaan halkan joogayo?

## Maxaa dhacaya haddii la ogaado in wadan kale uu masuul kayahay baadhista dalbashadaada?

→ *Haddii ay tani tahay dalbashadaadii magangalyo ee ugu horeysay eed ka samaysay wadan Dublin katirsan, waxaa laguu diri doonaa wadan kale sababtoo ah waxaa wadankaas jooga hooyadaa, aabahaa, walaalkaa, walaashaa, eedadaa adeerkaa, abtigaa, ayaydaa hooyo, ayaydaa aabbe, iyaga ayaadna ku biiri doontaa oo aad wada gali doontaan baadhista codsiga magangalyo.*[4]

→ *Haddii aadan halkan ka dalban magangalyo, laakiin aad magangalyo ka dalbatay wadan kale oo Dublin katirsan wakhti lasoo dhaafay, waxaa dib laguugu diri karaa wadankaas si maamulka halkaas ka jira ay u tixgaliyaan dalabakaaga*[5]

**Labada siyaaboodba, waxay qaadan kartaa ilaa shan bilood in la qaato go'aan laguugu wareejinayo wadan kale oo Dublin katirsan, ha ka bilaabato wakhtiga aad magangalyada codsatay ama ha kabilaabato wakhtiga aan ogaano inaad magangalyo caalami ah ka dalbatay wadan kale oo Dublin katirsan. Maamuladda ayaa kugu wargalin doona go'aankan sida ugu dhakhsaha badan uguna macquulsan kadib marka go'aanka la gaaro.**

→ *Haddii aadan magangalyo waydiisan wadankan, oo dalbashadaadii magangalyada wadanka kalana la diiday, kadib markii si buuxda loo baaray, waxaan waydiisanaynaa in wadanka kale uu dib kuu celiyo ama aan sii wadno sidii laguugu celin lahaa wadankii aad asal ahaan kasoo jeeday ama lagu siiyo magangalyo joogta ah, ama laguu diro wadan sadexaad oo kale oo amni ah.*

4) **Waxaad maqli kartaa dadka oo tan ku tilmaamaya 'xukun qaadasho'.**
5) **Waxaad maqli kartaa dadka oo tan ku tilmaamaya 'dib u celin'.**

Haddii aan go'aansano in wadan kale uu masuul kayahay dalabkaaga magangalyo, marka wadanka la waydiistay inuu qaado masuuliyadaada uu aqbalo inuu saas yeelo, waxaa si rasmi ah laguugu wargalin doonaa xaqiiqada ah in codsigaaga aad ku doonaysid magangalyada caalamiga ah aanaan baadhi doonin oo aan markaas kuu wareejin doono wadanka masuulka ka ah.

Wareejintaadu waxay ku dhici doontaa lix bilood gudahood oo ka bilaabmata wakhtiga wadanka kale uu aqbalay masuuliyaddaada, ama go'aanka kama danbaysta ah laga gaaro racfaanka ama dib u eegista, haddii aadan ogalaan oo aad go'aansato inaad ka dooddo go'aankan, (fiiri qaybta hoose ee sharaxaysa waxa tan loola jeedo!). Xadidka wakhtigan waxaa loo kordhin doonaa hal sano haddii lagu xidho, ama ilaa 18 bilood hadaad baxsato ood cararto.




©iStockphoto / Joe Gough

## Maxaa dhacaya hadaadan rabin inaad aaddo wadan kale?

### TAN KALA HADAL WAKIILKAAGA!

Haddii aan go'aansano inaaad aaddo wadan kale si halkaas codsigaaga loogu baadho oo aad taas diido, waxaa suurtagal ah inaad ka dooddo go'aanka wareejinta. Tan waxaan ugu yeernaa 'racfaan' ama 'dib u eegis'.

Marka aad hay'adaha dowladda ka hesho go'aanka wareejinta ee rasmiga ah, waxaad haysataa muddo dhan 30 maalmood gudahood, oo aad ku codsan karto racfaanka ama wax ka beddelka goaankaas, adigoo la xiriiraaya Maxkamadda maamulka. Aad bay muhiim u tahay inaad racfaanka ku gudbiso inta lgu guda jiro wakhigaas la tilmaamay. Wakiilkaagu waa inuu tan kaa caawiyaa.

- Waxaad haysataa (7) maalmood si aad u codsato in wareejintaada la joojiyo inta racfaankaaga labaadhayo. Maxkamad ama xeer beeg ayaa waxyar kadib go'aan ka gaari doonta codsigan. Haddii ay kuu diidaan joojinta, waxaa laguu sheegi doonaa sababaha arintas keentay.
- Dhinaca danbe ee warqaddan waxaa ku qoran warbixinta meesha lagala xiriirayo masuuliyiinta marka la rabo in racfaan laga qaato go'aanka wadankan.
- Inta lagu guda jiro nidaamka 'racfaanka' waxaa lagu siin doonaa caawin sharci iyo, haddey macquul tahay caawin luuqadeed ood ka hesho turjumaan. Waxaad waydiisan kartaa in lagu siiyo caawin sharci oo lacag la'aan ah haddii aadan lacag u haysan. Dhinaca danbe ee warqaddan waxaa ku yaalla macluumaadka faahfaahinta meesha lagala xiriirayo ururada bixiya caawinta sharci oo kaa caawin kara racfaankaaga.

## Xidhid

Dadka aan xor u ahayn in ay u safraan meeshay rabaan oo dagan dhisme xidhan oo aysan ka tagi karin waxaa la dhahaa way 'xidhanyihiin".

Haddii aad tahay ilmo aan cidina la socon waxaa laga yaabaa inaad ku noolaato guri ay shuruuc ka jirto sidaa owgeed, waa inaad habaynkii gudaha joogtaa ama markey mugdi tahay habaynkii, ama shuruucda macnahoodu yahay inaad u sheegto dadka ku ilaalinaya markaad dibadda u baxaysid ood rabto inaad soo noqoto. Shrucuudan waxay u jiraan in la ilaaliyo ammaankaaga. Tan macnaheedu ma aha inaad ku jirto meel xabsi ah.

### CARUURTA WALIGOOD LAMA XIDHO!

**Miyaad ku jirtaa meelaha la isku xidho? Haddii aadan hubin inaad xidhantahay, fadlan maamulka waydii, wakiilkaaga ama lataliyahaaga sharci[6)] sida ugu dhakhsaha badan ugana macquulsan. Kadib iyaga ayaad kala hadli kartaa wixii ku saabsan xaladaada haddii aad xidhantahayna waxaad kala hadli kartaa inay macquul tahay inaad ka dooddo go'aanka xidhista!**

Waxaa jira khatarta ah in laga yaabo in lagu xidho inta lagu guda jiro nidaamka Dublin. Inta badan, tani waxay dhacdaa marka maamulada gobalku aysan rumaysnayn inaad ka yartahay 18 sano oo ay ka cabsanyaan in laga yaabo inaad baxsato ama aad ka dhuumato iyadoo ay sababtu tahay inaad ka cabsanaysid in laguu diro wadan kale.

Waxaad xaq u leedahay in qoraal ahaan laguugu soo sheego sababaha laguu xidhay, iyo sidoo kale macquulgalnimada inaad ka doodi karto amarka xidhigga. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay caawin sharci haddii aad rabto inaad ka dooddo amarka xadhigga, sidaa darteed lahadal walkiilkaaga ama lataliyahaaga sharci haddii aadan faraxsanayn.

**6) Qof ay maamulku u aqoonsanyihiin inuu danaahaga ka shaqaynaya sharciga hortiisa. Wakiilkaagu iyo/ama maamulku waa inay kaala taliyaan inaad u baahantahay mid, laakiin sidoo kale waxaad waydiisan kartaa inay mid adiga ku matala magacaabaan. Ka fiiri dhabarka warqaddan ururada kusiin kara qareen sharci oo ku matala.**



Haddii lagu xidho inta lagu guda jiro nidaamka Dublin, qaab dhismeedka wakhtiga nidaamkaaga wuxuu noqon doonaa sida soo socota: waa inaan waydiinaa wadanka kale inuu masuuliyadda ku qaato **hal bil** gudaheed oo kabilaabmata wakhtiga gudbinta dalabkaaga magangalyo. Wadanka codsiga loo diray waa inuu ku soo jawabaa **laba asbuuc** gudahood wakhtigaas kadib. Ugu danbayntii, haddii aad ku jirto meesha la isku xidho, wareejintaada waxaa lagu fulinayaa **lix asbuuc** gudahood oo ka bilaabmata aqbalaadda codsiga ee wadanka masuulka ka ah.

Haddii aad go'aansato inaad ka dooddo go'aanka wareejinta marka aad kujirto meesha la isku xidho, maamulada gobalku awood uma laha inay kugu wareejiyaan lix bilood gudahood. Maamulada gobalku way kusoo wargalin doonaan kadibna adiga ayay ku jirtaa xulashooyinku.

Haddii maamulada gobalku aysan u hogaansamin qaab dhismeedka wakhtiga ee ay ku waydiinayaan wadan kale inuu qaado masuuliyadaada, ama aysan wareejintaada ku fulin wakhtigii loogu talgalay, xidhitaankaaga ama sii hayntaada looga danlahaa wareejinta sida uu qabo Xeerka Dublin wuu dhamaan doonaa. Markay saas tahay, wakhtiyadii caadiga ahaa ee la xadiday ee lagu sheegay bogga 11 ayaa ku dabakhmi doona.



©European Union




©European Union

## Maxay yihiin xuquuqaha aad leedahay inta lagu jiro mudada aan ku go'aansanayno cidda masuulka kaa ah?

Waxaad xaq u leedahay inaad wadankan joogto haddii aan anagu masuul kanahay baadhista codsigaaga magangalyo, ama, haddii wadan kale uu masuul kayahay, ilaa halkaas lagaaga wareejinayo. Haddii wadanka aad hadda joogto uu masuul kayahay baadhista codsigaaga magangalyo, waxaad xaq u leedahay inaad halkan joogto ugu yaraan ilaa go'aanka ugu horeeya laga qaadanayo dalabkaaga magangalyo. Sidoo kale waxaa kuu qoran inaad ka faa'iidaysato nacfiga goobta tusaale ahaan deegaan, cunto, iwm. iyo sidoo kale daryeelka caaafimaad ee asaasiga ah iyo caawinta caafimaad ee amarjansiga ah. Sidoo kale waxaad xaq u leedahay inaad iskuul dhigato.

Waxaa lagu siin doonaa fursadda aad nagu siinaysid warbixinta ku saabsan xaaladaada iyo joogitaanka xubno qoyskaaga ka mid ah wadamada Dublin taas ood noogu sheegaysid hadal iyo/ama qoraal marka aad saas samaynaysidna, inaad isticmaasho luuqadaada hooyo ee aad sida wanaagsan ugu hadasho (ama waxaad heli turjumaan haddii loo baahdo). Sidoo kale waxaad heli doontaa go'aan qoraal ah oo laguugu wareejinayo wadan kale. Sidoo kale waxaa laguu ogalyahay inaad nagala soo xiriirto wixii warbixin dheeri ah iyo/ama inaad la xiriirto xafiiska Haayadda Qaxootiga Aduunka (UNHCR) ee wadankan.

**Wakiilkaaga iyo maamulada gobalka ayaa kuu sharixi doona waxbadan oo kusaabsan xuquuqahaaga!**



## Maxaa ku dhici doona warbxinta shakhsiyeed ee aad bixiso? Sideen ku ogaan karaa inaan loo isticmaalin ujeeddo khaldan?

Maamulada wadamada Dublin waxay iswaydaarsan karaan wabrixinta aad bixinayso inta lagu gudo jiro nidaamka Dublin oo kaliya si ay u gutaan waajibaadkooda sida uu qabo Xeerka Dublin.

Waxaad xaq u yeelan doontaa inaad galaangal u lahaato:

- Warbixinta kula xiriirta. Waxaad xaq u leedahay inaad codsato in xogtaas la badalo hadeysan sax ahayn ama aysan run ahayn, ama la tirtiro haddii loo baroosees gareeyay si aan sharci ahayn;
- Warbixinta sharaxaysa sida loo codsado in xogtaada la saxo ama la tiritiro, oo ay ku jiraan macluumaadka meesha lagaala xiriirayo cidda ay khusayso ee loo aqoonsaday inay masuul kayihiin nidaamkaaga Dublin, iyo maamulka ilaalinta xogta qaranka ee masuulka ka ah codsiyada dhagaysiga dacwadaha khuseeya ilaalinta xogta shakhsiyeed.

## XAGEED CAAWIN U RAADSAN KARTAA?

**Cinwaanka iyo halka lagala xiriiri karo hawlwadeennada magangayoddoonista**
Maahanmuuttovirasto
(Hoggaanka socdaalka)
PL 10, 00086 Maahanmuuttovirasto
Lambarka adeegga ee loogu talaggalay magangalyoddoonayaasha:
+358 295 790 600
(Sababo la xiriira dhanka amniga awgood, Hoggaanka socdaalku telefoon ahaan kuguma siin karo, macluumaadka ku saabsan codsiga magangalyada ama go'aanka codsigaas toonna.)
migri@migri.fi www.migri.fi

**Wakiilka ilmaha aan qaangaarin**
Ilmaha aan qaangaarin ee magangalyoddoonka ah ee keligood yimid, waxaa wakiil u samaynaysa maxkamadda. Xerada qaxootiga ayaa u gudbinaysa maxkamadda codsiga ku saabsan wakiil u samayntaas.

**Badbaadada carruurta**
Xerada qaxootiga waxaa waajib ka saaran yahay in ilmaha ay u diyaariso adeegyada daryeelka arrimaha bulshada, kuwaasoo qofka sooshaalka ah ee ka mas'uulka ah arrimaha ilmaha yar uu u arko, in ay lagamammaarmaan u yihiin dhanka caafimaadka iyo korriinka ilmahaas. Su'aalaha arrimahaas ku saabsan, waxaad kala xiriiri kartaa sooshaalka xeradaada qaxootiga.

**Hay'adda ka mas'uulka ah nidaamka Dublin**
Maahanmuuttovirasto
(Hoggaanka socdaalka)
Kor ayaa lagu soo sheegay halka lagala xiriiri karo
Halka lagala xiriiri karo hay'adda ilaalinta xogta qaranka
Tietosuojavaltuutetun toimisto
(Xafiiska wakiilka ilaalinta xogta)
Cinwaanka la tago:
Lintulahdenkuja 4, 00530 Helsinki
Cinwaanka boostada:
PL 800, 00531 Helsinki
Xiriirnta telefoonnada:
+358 29 566 6700
Telefoonka talsosiinta guud ee loogu talaggalay qofka shakhsiga ah:
+358 29 566 6777
talaada-khamiis, saacadda 9.00-11.00
tietosuoja@om.fi www.tietosuoja.fi

**Diiwaanhayaha Eurodac iyo wakiilkiisa**
Meelaha lagala xiriiri karo:
Maamulka booliska (Poliisihallitus)
iyo Hoggaanka socdaalka
(Maahanmuuttovirasto)

**Halka lagala soo xiriiri karo xafiisyada diiwaanhayaha**
Poliisihallitus (Maamulka booliska)
PL 1000 (Vuorimiehentie 3),
02151 Espoo
tel: +358 295 480 181
kirjaamo.poliisihallitus@poliisi.fi

Maahanmuuttovirasto
(Hoggaanka socdaalka)
PL 10, 00086 Maahanmuuttovirasto
tel: +358 295 430 431
(xiriirinta telefoonnada)
migri@migri.fi www.migri.fi

Haddii aad doonayso inaad aragto macluumaadka adiga kugu saabsan ee lagu qoray nidaamka Eurodac, waxaad si shakhsiyan ah codsi ugu gudbisaa booliska. U diyaargaroow inaad caddayso aqoonsigaaga shakhsiyadeed. Waxaan kuu soo jeedinaynnaa inaad la xiriirto xafiiska booliska ee kaa qaaday codsigaaga magangalyada. Meelaha aad kala xiriiri kartid xafiisyada booliska waxaad ke heleysaa bogga internetka ee booliska, poliisi.fi.

**Suomen Punainen Risti (Laanqaynrta cas ee Finland)**
Tehtaankatu 1 a
00140 Helsinki
tel: +358 20 701 2000
info@punainenristi.fi
www.punainenristi.fi

Baafinta ehelkaaga kaa maqan ee la la' yahay

**Xafiisyada caawimaadda arrimaha sharciga iyo hay'adaha taageerada qaxootiga**
Caawimaadda arrimaha sharciga waxaa laga helaa xafiisyada caawimaadda arrimaha sharciga iyo xafiisyada kale ee qareennada, kuwaasoo xerada qaxootiga u soo sheegay in ay siin karaan dadka magangalyoddoonka ah adeegyada caawimaadda arrimaha sharciga. Shaqaalaha xerada qaxootiga ayaad ka heleysaa macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan caawiyayaasha arrimaha sharciga ee aagga aad ku nooshahay.

**Hay'adda caalamiga ah ee qaabilsan arrimaha dadka soo galootiga ah (IOM) Halka lagala xiriiri karo xafiiska-Finland**
IOM FINLAND
Unioninkatu 13, dabaqa 6-aad
00130 Helsinki
Cinwaanka boostada
PL 851, 00101 Helsinki
tel: +358 9 684 1150
iomhelsinki@iom.int finland.iom.int

Haddii aad doonayso inaad si ikhtiyaarkaaga ah dib ugu noqoto dalkaagii hooyo, waxaad talada arrinkaas ku saabsan waydiisataa xerada qaxootiga.

**Xafiis goboleedka ugu dhow ee hay'adda Qaramada midoobay u qaabilsan arrimaha qaxootiga**
UNHCR
Sveavägen 166, 15th fl.,
11346 Stockholm,
Sverige
tel: +46 10 10 12 800
swest@unhcr.org

21.02.2024 - somali

European Commission

EUROPEAN UNION AGENCY FOR ASYLUM

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

POLIISI
POLISEN I FINLAND
Police of Finland

Rajavartiolaitos
Gränsbevakningsväsendet
The Finnish Border Guard